

Helsinki

# Ku soo dhawoow dugsigga

Hagitaan ku socda waalidka ardeyga fasalka  
koowaad Sannad-dugsiyeedka 2025–2026



# Taariikhaha muhiimka ah

## 18.11.2024–18.1.2025

Dugsiyadu waxaay qabanqaabin karaan munaasabado wacyigalin ah. Ka hubi wakhtiyadooda bogagga internetka ee dugsiya: [edu.hel.fi/kouluhaku](http://edu.hel.fi/kouluhaku).

## 7.–26.1.2025

Iska diwaangelinta elegtrooniga ah ee dugsiya waxaa laga helayaa cinwaanka [asti.hel.fi](http://asti.hel.fi). Asti waxaa layskaga diwaangelin karaa dugsiya dhow iyo dugsiyada kale, sida kuwa waxbarista la xoojiyay iyo waxbarista labada luqadood ah iyo kuwa kale oo aan ahayn dugsiya dhow. Ilmaha ciwaankiisa guriga ayaa boosto ahaan loogu soo dirayaa **2.1.2025** laga bilaabo ogaysiiska waajibaadka waxbarashada, kaas oo sheegaya in waajibka waxbarashadu u bilaabmay ilmaha.

Haddii ilmahaaga aad u codsanayso boos ku yaalla cinwaan kale ama luqadda hooyo aanan lagu dhigin, waa in codsigaas ay aqbalaan dhammaan mas'uulada oo dhan. Oggolaanshaha waa in la bixiyaa ugu dambeyn **26.1.2025**.

Haddii aad ilmahaaga ka diwaangelin waydo waxbarista ay magaaladu qabanqaabinayso (oo aad tusaale ahaan dugsi gaar ah galinayso ama uu ka qaybqaadanayo waxbarista guriga), ku sheeg arrintaas Asti. Xogtaas waa muhiim in la sheego sababta oo ah magaalada ayaa kormeeraysa in la hirgaliyo waajibka waxbarashada.

## 20.–31.1.2025

Maamulaha dugsiya dhow ayaa ardeyga dugsiyiisa iman doonta iyo waalidkood u yeedhaya si loo maqlo intaan la gaadhin go'aanka taageerada gaarka ah.

## arbacada 22.1.2025 saacadda 8–10

Dugsiya sidoo kale waxaa layskaga diwaangelin karaa dugsiya dhow iyadoo la tago. U sii qaado ogaysiiska waajibaadka waxbarashada ee ilmahaaga. Haddii aad iska diwaangalisayba Asti, uma baahnid inaad dugsiya tagto.

## laga bilaabo isniinta 27.1.2025

Haddii aad Helsinki u soo guurtaan marka isdiwaangelintu dhammaato kaddib, la xidhiidh maamulaha dugsiyaaga dhow. Waxaad ka hubin kartaa bogga [edu.hel.fi/kouluhaku](http://edu.hel.fi/kouluhaku) dugsiya dhow ee ku saleysan ciwaanka aad deggantahiin. Haddii aad Helsinki u soo guurtaan is diwaangelintu markay dhamaato kaddib oo aad rabto inaad ilmahaaga boos uga xareeyso waxbarashada af ingiriiska ku baxaysa ama waxbarashada baaxadda leh ee labada luqadood, waxaad ku codsan kartaa boosaska macquulka ah ee bannaan codsiga buuxinta ah ee bisha Maajo bilaabmaya. Macluumaadka khuseeya codsiga buuxinta ah waxaad ka heli kartaa bogagga dugsiya isbaddalka bilaha abriil-maajo. Codsiga buuxinta laguma soo codsan karo haddii uu qofku deggenaa meel aanan ahayn Helsinki wakhtiga isdiwaangelintu ay bilowga tahay ee Jannaayo.

## 3.–14.2.2025

Maamulaha dugsiya dhow ayaa ardeyga dugsiyiisa iman doonta iyo waalidkood u yeedhaya si loo maqlo intaan la gaadhin go'aanka taageerada gaarka ah, marka arrinta jirtaa ay khuseeyso qabanqaabinta waxbarista baahida gaarka ah ee lagu bixinayo dugsiya baahida gaarka ah ama fasalka baahida gaarka ah ee la taageerayo.

## 7.3.2025

Go'aamada lagu sheegayo in ardeyda la qaatay waxaa waalidka loogu dirayaa boosto ahaan. Go'aanka khuseeya taageerada gaarka ah boosto ahaan ayaa guriga loogu soo dirayaa.

## 17.3.–16.4.2025

Muddada codsiga ee waxqabadka naadiga galabtii. Waalidku waxaay Wilma-da ku sameysan karaan akawn loogu talo galay waalidka/ waxaay ku dari karaan akawnka Wilma-da ee ilmaha dugsiga bilaabaya iyaga oo u maraya is-aqoonsashada [suomi-fi 17.3.2025](#) laga bilaabo. Go'aannada waxaa guryaha loogu dirayaa boostada ugu dambyan billowga bisha Luulyo ee 2025.

## 30.3.2025

Su'aalaha dheeraadka ah ee khuseeya qabanqabada waxbarashada ee lagu bixin karo Asti wuu dhamaanayaa.

## Guga 2025

Dugsiyadu waxaay u qabanqaabinayaan ardeyda bilaabaya fasalka koowaad munaasabado barasho ah. Macluumaadka dheeriga ah waxaa laga heli karaa dugsiyada iyo bogaggooda internetka.

Dugsiyada hoose-dhexe wakhtiyadooda waxbarashada iyo fasaxyada sannad-dugsiyeedka 2025–2026 waxaa lagu shaacinayaa bogga internetka ee [edu.hel.fi/tervetuloakouluun](http://edu.hel.fi/tervetuloakouluun) intaanu dhamaanin sannadka 2024.



# Sidan ayaa dugsiga layskaga diwaangaliyaa

Dugsiga waxaa la isaga diinwaageliyaa qaab elektroonig ah ama dugsiga oo toos loo tago. Internetka iskaga diwaangali dugsiga **7.–26.1.2025** cinwaanka [asti.hel.fi](https://asti.hel.fi) ama adiga oo dugsiga taga arabacada **22.1.2025 saacadda 8–10**.

## Isdiwaangelinta elektrooniga ah

Ka diwaangeli ilmahaaga dugsiga 7.–26.1.2025 intaan la gaadhin cinwaanka [asti.hel.fi](https://asti.hel.fi). Ilmahaaga ogaysiiska loo soo diray ee waajibnimada waxbarashada ayaad ka arki kartaa dugsigiisa dhow, waxaa ogaysiisyadaas la soo dirayaa bilowga bisha Jannaayo 2025 boosto ahaan ayaana cinwaanka guriga ilmaha loogu soo dirayaa. Magaalada ayaa ilmaha u qabanaysa dugsiga u dhow ee ku saleysan cinwaanka ku qoran nidaamka diwaanka dadweynaha ee uu ilmuhu degganyahay iyo luqaddiisa hooyo. Macluumaadka khuseeya dugsiga dhow waxaa sidoo kale laga heli karaa Asti.

Asti waxaad ilmahaaga uga diwaangelin kartaa dugsiyada magaalada Helsinki iyo noocyada waxbarista ah ee lagu qabanqaabiyo. Fursadaha aad haysataa waa:

- ▶ dugsiga dhow ee luqadda hooyo lagu saleynayo
- ▶ dugsiga dhow ee luqadda labaad ee dalka lagu saleynayo (dugsi af iswidhis lagaga hadlo beddelka af finnishka)

- ▶ waxbarashada laga xoojiyay muusiga
- ▶ waxbarashada ku baxaysa afka ingiriiska
- ▶ waxbarasho labo luqadeed ah
- ▶ barista luqadda iswidhishka (waxaay ka bilaabataa barbaarin-horaadka/waxbarasho-horaadka)
- ▶ dugsi kale oo aan ahayn dugsiga dhow oo lagu saleynayo luqadda A1 kaas oo aan lagu dhigan karin dugsiga dhow
- ▶ dugsi kale oo aan ahayn dugsiga dhow oo sabab kale loo galayo

## Isdiwaangelinta dugsiga 22.1.2025

Waxaad sidoo kale ilmahaaga ka diwaangalin kartaa dugsiyiisa dhow arabacada 22.1.2025 saacadda 8–10. Haddii aad ilmahaaga kaba diwaangalisyay Asti, dugsiga uma baahnid inaad tagto. Ugu horreyn waxaa dugsiga la isaga diiwaangelinayaa qaab elektroonig ah iyadoo la adeegsanayo adeegga dan-qabsashada ee Asti. Dugsiga waa lagaaga caawinayaa isdiwaangelinta. U soo qaado dugsiga ogaysiiska isdiwaangelinta iyo qalabka isdiwaangelinta aad ugu baahantahay (tusaale ahaan bangiga internetka).

# Helsinki



## Talobixinta barbaarinta iyo waxbarashada

tel. 09 310 44986 maalmaha shaqada, saacadda 10–12 ja 13–15  
iimayl koulutusneuvonta@hel.fi



cinwaanka booqashada: Työpajankatu 8, 00580 Helsinki  
cinwaanka boostada: SB 51300, 00099 Magaalada Helsinki  
telefoonka dhexe: 09 310 8600 maalmaha shaqada saacadda 8.15–16



[edu.hel.fi/tervetuloakouluun](https://edu.hel.fi/tervetuloakouluun)

## Follow us:



#HelsinkiOppii



@HelsinkiOppii



#HelsinkiOppii



Kasvatus ja koulutus



Kasvatuksen ja koulutuksen  
toimiala  
City of Helsinki

[hel.fi/welcometoschool](https://hel.fi/welcometoschool)

**Publisher:** City of Helsinki's Education Division

**Illustrator:** Riku Ounaslehto

**Printed by** Grano Oy 11/2024

**Information** in this guide was revised in October 2023. We reserve the right to make changes.

**For up-to-date information**, see [hel.fi/welcometoschool](https://hel.fi/welcometoschool) and the school websites.

